Adeegga Dadweynaha ee Raadraacida Xiriirka Qalabka Ogeysiiska

Tusmooyinka

Tilmaamaha PSA 4

Tilmaamaha Tusmada 4

Qodobada Hadalka PSA 4

Horudhac (Dooro Hal) 4

Dadaalka Raadraacida Xiriirka (Dooro Labo) 5

Gunaanad (Dooro Hal) 6

Dhaqamada Fiican ee Duubista PSA 6

Tilmaamaha Duubista ee PSA 7

Tilmaamaha iPhone ama iPad 7

Tilmaamaha Windows 7

Tilmaamaha Mac 7

Tilmaamaha Gudbinta PSA 8

Su'aalaha Inta Badan La Isweydiiyo 8

Waa maxay Raadraaca Xiriirka? 8

Maxay tahay sababta aan uga qaybqaadanayo? 9

Maxaa ku dhacaya PSA-gayga kadib markaan u diro Susan.Dunlap@ky.gov? 9

Raadraacida Xiriirka waa furaha caawinta bukaannada COVID-19 iyo ogeysiinta dadka suurtagalka ah in la qaadsiiyey cudurka si gacan looga geysto joojinta faafitaanka cudurka. Maaddaama ganacsiyadu ay bilaabayaan inay dib u furmaan oo tilmaamaha kala-fogaanshaha bulshada la dabcinaayo/la fududeynayo, Raadraacida Xiriirka ayaa ah habka ugu nabdoon ee dadka loogu soo celin karo shaqada oo gacana looga geysan karo dib u furitaanka dhaqaalaheena. **Isxilqaankaaga ku aadan caafimaadka iyo badbaadada walaalaheena reer Kentucky waa muhiim maadaama aan sii wadno in si badbaado leh dib loogu furo Bulshadeena.** Waxaan heysanaa hal fursad oo aan ku sixi karno arrintaan.

Iyada oo lala kaashanayoo Waaxda Caafimaadka Dadweynaha (DPH), marin u helkaaga, iyo wadashaqeynta bulshooyinka deegaankeena ayaa ah mid muhiim u ah guul ka gaarista Raadraacida Xiriirka. Xirmadan ayaa ku siinaysa macluumaadka aad u baahan tahay si aad u sharraxdo una dhiirrigeliso dadaalka.

Waxaan bulshada deegaanka iyo hogaamiyaasha fikradaha ku martiqaadeynaa inay kor u qaadaan nabadgeliyada, amniga, iyo dhaqangelinta dadaallada Raadraacida Xiriirka ee Kentucky iyada oo loo marayo abuurista Ogeysiiska Adeegga Dadweynaha (PSA). Qalabkan PSA wuxuu ku siinayaa macluumaadka loo baahan yahay si laguugu sharxo laguugna dhiirrigeliyo dadaalka, iyo sidoo kale laguu fahansiiyo tillaabooyinka duubista fiidiyow.

Si aad u bilowdo, raac saddexdaan tallaabo:

1. Akhriso Tilmaamaha Raadraacida Xiriirka PSA ee Kentucky, Qodobada Hadalka PSA ee kugu habboon, Tilmaamaha Duubista PSA, iyo Su'aalaha Inta Badan la Isweydiiyo.
2. Duub PSA-gaaga Raadraacida Xiriirka ee Kentucky.
3. PSA-gaaga Raadraacida Xiriirka ee Kentucky ku soo shaaci akoonada warbaahinta bulshada
    a. Haddii aad jeceshahay in PSA-gaaga lagu soo bandhigo kanaalada dowladeed ee kaladuwan, fadlan PSA-gaaga Raadraacoda Xiriirka ee Kentucky u dir Susan.Dunlap@ky.gov.

Tilmaamaha PSA

PSA 30-45 ilbiriqsi ah oo ku saabsan dadaalka Raadraacida Xiriirka ee Kentucky waxay gacan ka geysanaysaa soo bandhigida, kor u qaadida, iyo dib-ugu-xaqiijinta bulshooyinka deegaanka muhiimadda ay leedahay Raadraacida Xiriirka. Si hufan si loogu duubo PSA, fadlan xaqiiji inaad raacdo tilmaamaha hoos ku qoran.

Tilmaamaha Tusmada

- PSAs waxay noqon doonaan cajalado fiidiyow ah oo la daabo iyadoo la isticmaalayo farriimaha laga helo halkaan hoose ee qeybta "**Qodobada Hadalka ee PSA**"
- PSAs waxay adkayn doontaa nabadgeliyada, amniga, iyo qarsoodiga Raadraacida Xiriirka
- PSAs waxay horumarin doontaa dadaallada Caafimaadka Dadweynaha oo ay ka mid yihiin, laakiin aan ku xaddidnayn*:
    - Ka jawaabista wicitaanada Raadraacida Xiriirka
    - Kala-fogaanshaha bulshada*
    - Marooyinka Maaskarada ah**

  **Markaad duubeysid PSA-gaaga, fadlan ka war hay agagaarkaaga oo raac tilmaamaha kala-fogaanshaha bulshada.*

  ***Tani micnaheedu maahan inaad maaskaro u xirato PSA-gaaga - kaliya xiro maaskarada haddii aad PSA ku duubeyso meel dad badan ay joogaan adigoo ilaalinaya kala-fogaanshaha bulshada. Fadlan la soco in xirashada maaskaro ay ku adkaynayso dadka kale inay fahmaan PSA-gaaga.*
- PSA-yada Raadraacida Xiriirka looguma talagalin in looga helo faa'ido shaqsiyeed ama mid siyaasadeed.

Qodobbada Hadalka PSA

Sida ugu habboon, 30-45 ilbiriqsiyo kasta PSA waa inay ku jirtaa hal (1) farriin oo hordhac ah, laba (2) qodob oo hadalka Raadraacida Xiriirka ah, iyo in lagu gabagabeeyo hal (1) farriin oo gunaanad ah. Si fiican ayaad u taqaanaa bulshadaada, sidaas darteed dooro qoraalka PSA-gaaga adiga halkaan hoose ka xulanaya qodobbada hadalka ee ugu habboon.

Hordhac (Dooro Hal)

- Isxilqaankaaga ee ku aadan caafimaadka qoysaskayaga iyo asxaabtayada ayaa noo oggolaaday inaan ballaarino qallooca. Ayadoo laga faa'ideysanaayo caawimadaada, dadaalka Raadraacida Xiriirka ee Kentucky wuxuu gacan ka geysan karaa joojinta faafitaanka COVID-19.

- Raadraacida Xiriirka ma ahan wax cusub - laakiin waxaan u baahanahay inaan sare u qaadno dadaalkeena si Kentucky ay u furnaato. Iyada oo gacan laga helayo dadaalka Raadraacida Xiriirka ee Kentucky, waxaan joojin karnaa faafitaanka COVID-19.
- Iyada oo gacan laga helayo shaqaalahayaga Caafimaadka Dadweynaha ee deegaanka, waxaan awoodnaa inaan la soconno oo aan joojino faafitaanka fayraska. Raadraacida Xiriirku waa kheyraadka Caafimaadka Dadweynaha oo qarsoodi ah.

Dadaalka Raadraacida Xiriirka (Dooro Labo)

- Raadraacida Xiriirinta waxay isku keenaysaa kaqeybqaadashada dadweynaha iyo awooda tikniyoolajiyada si gacan looga geysto xakameynta faafitaanka fayraska. Ka jawaab wicitaanka si aad Kentucky uga dhigto mid caafimaad qabta marka la joogo guriga iyo marka la joogo shaqada.
- Raadraacida Xiriirku waa qaab wadashaqeyn ah, oo tikniyoolajiyad loo isticmaalo si aan ugu ilaalin karno caafimaadka iyo nabadgeliyada dadka reer Kentucky ah illaa aan si tartiib ah ugu laabanayso qaar ka mid ah howlaheena caadiga ahaa.
- Si loo ilaaliyo qarsoodiga macluumaadka bukaanka, dadka xiriirada ah looma sheegi doono aqoonsiga qofka laga yaabo inuu qaadsiiyey cudurka. Waxaa loo sheegi doonaa waxay u baahan yihiin inay sameyaan si ay naftooda u daryeelaan, si ay u yareeyaan halista ay gaarsiin karaan dadka kale, iyo si ay bulshadooda uga ilaaliyaan cudur qaadsiin dheeraad ah.
- Iyadoo la isticmaalayo dadaalkan, waxaan awoodi karnaa inaan saadaalino meelaha muhiimka ah si aan u qaadno taxadarka lagama maarmaanka ah si bulshooyinka u sii ahaadaan kuwo nabadgeliyo iyo caafimaad qaba. Waa muhiim inaad ka jawaabto haddii lagu soo waco si aad Kentucky uga dhigto mid caafimaad qabta markaad joogto guriga iyo markaad joogto shaqadaba.
- Nidaamkan qarsoodiga ah ee ka jira gobolka oo dhan wuxuu noo oggolaanayaa inaan raacno meel kasta oo uu fayras aado... xuduudaha degmada ama ka shisheeye... si aan dadka uga digno oo aan u joojino faafitaanka fayraska.
- Raadraaciyaasha Xiriirka marna kuma weydiin doonaan macluumaadkaaga dhaqaale, shakhsiyeed, lacag ama baaswaadhkaaga.

- Caafimaadka iyo nabadgeliyada qoyskeena iyo asxaabteyda ayaa ah waxyaabaha iigu muhiimsan aniga. Raadraacida Xiriirka waxay gacan ka geysaneysaa xaqiijinta in annaga bulsho ahaan aan sii wadno inaan caafimaadqab ku joogno guriga iyo shaqada.

Gunaanad (Dooro Hal)

- Waxaan u baahan nahay agab kasta oo aan ku ilaalin karno dadkeenna. Kooxda Kentucky waxay u baahan yihiin inaad ka jawaabto wicitaanka.
- Madaxa hala gelin ciidda/ha is qarinin. Macluumaadkan si dhab ah u qaado si adiga iyo qoyskaagaba aad nabadgeliyo ugu joogtaan. Kooxda Kentucky waxay u baahan yihiin inaad ka jawaabto wicitaanka.
- Xusuusnow – inaan arrintaan ka gudbi doono, waxaana arrintaan uga gudbi doonaa si wadajir ah. Kooxda Kentucky waxay u baahan yihiin inaad ka jawaabto wicitaanka.

Dhaqamada Fiican ee Duubista PSA

Dhaqamadaan ugu wanaagsan ee soo socda ayaa kuu oggolaanaya inaad:

- Doorato Muuqaal Nadiif ah
    - Muuqaalka gadaal ah waa inuu u muuqdaa mid nadiif ah oo habaysan si uusan u mashquulin dhagaystayaashaada. Xaqiijiso inaad tahay xiddiga PSA-gaaga!
- Hesho Fikir
    - Waa inaad noqotaa hogaanka PSA-gaaga. Isku day inaad toos u fiiriso kamaradda. Haddii aad isticmaalaysid taleefan ama taablet si aad u duubto, xaqiiji inaad u duubto qaab jiif-jiif ah (jiifinaya taleefanka).
- Yuusan Dhaqdhaqaain Qalabkaaga Duubista
    - Haddii aad isticmaalayso taleefan, taablet ama kumbuyuutar si u duubto, xaqiiji in qalabkaaga duubista uu yahay mid aan dhaqdhaqaaq lahayn oo degan.
- Isticmaal Iftiin Sax ah
    - Xaqiiji inaad duubista ku sameyso meel leh iftiin badan oo dabiici ah (daaqadaha) ama ku dar/daar qalabyada iftiinka/nalka.

- Xaqiiji In Si Fiican Loo Maqlo Dhawaqaaga
    - Waxaa ugu wanaagsan in laga duubo meel gaar ah si looga fogaado dhawaaqyada meelaha kale kaaga imaada. Ka taxaddar dhawaaqyada dibedda ah sida dabaysha, dhismaha, xayawaanka guriga, iwm oo laga maqli karo fiidiyowgaaga. Waxaad u baahan doontaa inaad xaqiijiso inaad u dhowdahaya kamaraddaada, si makarafoonku uu usoo qaado dhawaqaaga.

Tilmaamaha Duubista PSA

Tilmaamaha iPhone ama iPad

1. Daar ablikeeshinka Kaamirada ee ku jira iPhone-kaaga ama iPad-kaaga
2. Taabo fiidiyow ama u wareeji dhanka midigta si aad ugu bedesho Fiidiyow
3. Taabo batoonka guduudan si aad u bilowdo duubista
4. Taabo batoonka Joojinta ee guduudan si aad u joojiso duubista fiidiyowga
5. Wax kasta oo la duubo si otomaatig ah ayaa loogu keydiyaa kaydka maktabada sawirada ee qalabkaaga

Tilmaamaha Windows

1. Kici/daar ablikeeshanka Kaamirada adigoo "Camera" ka raadinaya qeybta wax raadinta “search”
2. Ka bedel habka Kaameera ahaan una bedel habka Fiidiyowga ah. Kaameeradaadu hadda waa inay daarnaataa oo ay diyaar u ahaataa duubis
3. Guji batoonka Fiidiyowga oo bilaw duubista
4. Guji batoonka Fiidiyowga mar labaad si aad u joojiso fiidiyowga
5. Wax kasta oo la duubo si otomaatig ah ayaa loogu keydinaa qeybta keydka Kaamirada ee kambuyuutarka

Tilmaamaha Mac

1. Ablikeeshinka QuickTime Player, ka dooro File > New Movie Recording (duubis cusub)
2. Taabo batoonka duubista ee guduudan si aad u bilowdo duubista
3. Taabo batoonka gareeyga ah si aad u joojiso fiidiyowga
4. Xulo File > Save (Keydi) si aad u keydiso oo aad magac ugu yeesho duubista

Tilmaamaha gudbinta PSA

Markaad ku qanacdo muunada duubistaada, duub PSA-gaaga Raadraacida Xiriirka ee Kentucky oo ah 30-45 ilbiriqsi adigoo isticmaalaya dhaqamada ugu wanaagsan iyo qoraallada kore ee xulka ah.

Kadib markaad duubto PSA-gaaga ee ah 30-45 ilbiriqsi, fadlan PSA-gaaga ku soo shaaci akoonadaa warbaahinta bulshada adigoo isticmaalaya hashtag-yadan: #AnswertheCallKY #TeamKentuckyNeedsYou.

Haddii aad jeclaan lahayd in PSA-gaaga loo muujiyo fiidiyow wax lagu dardaray ahaan ama in laga soo daayo kanaalada kala duwan ee dawladda, fadlan PSA-gaaga Raadraacida Xiriirka ee Kentucky u dir Susan.Dunlap@ky.gov adigoo u diraya **fayl .mp4 ah.**

Su'aalaha Inta Badan la Isweydiiyo

Waa maxay Raadraacida Xiriirka?

Kentucky waxay hirgalinaysaa Raadraacida Xiriirka si gacan looga geysto joojinta faafitaanka cudurada sida COVID-19 iyo si looga caawiyo dadka reer Kentucky inay ku joogaan caafimaad iyo nabadgeliyo. Raadraacida Xiriirka waa muhiim si nabadgeliyo leh si loogu laabto shaqada iyadoo sidoo kale la kobcinayo dhaqaalaha.

- Shaqaalaha Caafimaadka Dadweynaha waxay la xiriiraan shakhsiyaadka qaba COVID-19 si ay u qiimeeyaan xaaladooda, ay u siiyaan kheyraad/macluumaad wax ku ool ah, oo ay wax uga weydiiyaan qof kasta oo ay u dhowaadeen/xiriir la yeesheen kuwaas oo laga yaabo inuu cudurkaasi ku dhacay.
- Dadka laga yaabo in la qaadsiiyey cudurka ayaa la ogeysiinayaa in laga yaabo inay qabaan cudurka COVID-19 waxaana la siinayaa tilmaamo waxaana lagu xiriirinaya kheyraadka deegaanka. Shakhsiyaadka waxay heli doonaan wicitaanno dabagal ah si loola socdo xaalkooda oo looga uruuriyo wixii macluumaad ah oo cusub.
- Iyadoo la raacayo tilmaamaha ay bixiyaan shaqaalaha Caafimaadka Dadweynaha, xiriirada waxay gacan ka geystaan joojinta faafitaanka COVID-19 iyo badbaadinta nolosha dadka reer Kentucky.

Tani waa qayb ka mid ah hanaan jira oo ay isticmaasho Waaxda Caafimaadka Dadweynaha ee Kentucky. Ujeeddada Raadraacida Xiriirka ayaa ah in la yareeyo khatarta caafimaad ee gaari karta dadka kale iyo bulshooyinka laga ilaaliyo cudur qaadis dheeraad ah. Dhammaan macluumaadka ay soo aruuriyaan shaqaalaha Caafimaadka Dadweynuhu waa mid gaar ah, loomana shaacin doono ama lalama wadaagi doono dadweynaha.

Maxay tahay sababta aan uga qaybqaadanayo?

Dadaalka Raadraacida Xiriirka ee Kentucky waa kheyraadka Caafimaadka Dadweynaha oo qarsoodi ah. Dadaalkani ayaa u oggolaanaya bulshada deegaanka inay aqoonsadaan meelaha suurtagalka ah inuu ka jiro COVID-19 iyo inay joojiyaan faafitaanka fayraska.

Maxaa ku dhacaya PSA-gayga kadib markaan u diro **Susan.Dunlap@ky.gov?**

Markaad oggolaato, xafiiska Guddoomiyaha Andy Beshear, Waaxda Caafimaadka Dadweynaha, iyo Golaha Adeegyada Caafimaadka iyo Qoyska (CHFS) waxay fiidiyowgaaga ku baahin doonaan warbaahinta bulshada (Facebook, Instagram, iyo Facebook) si gacan looga geysto kor u qaadida dadaalka Raadraacida Xiriirka. Waxaan kugu dhiirigelinaynaa inaad ku baahiso barahaaga bulshada sidoo kale!